



## Metro ayaa laga yaabaa in uu dariiqyada baska ee 3 iyo 4 ka qaado waddada James Street oo uu geeyo waddada Yesler Way

Waxaan u fiirsanaynaa siyaabaha aan u horumarin lahayn isku-hallaynta baska oo aan ugu adeegi lahayn baahida raacayaasha mara James Street

Dariiqyada baska ee 3 iyo 4 ayaa isticmaala basas xarig koronto ku xiran (trolley) oo mara jaamacadda Seattle Pacific University, Queen Anne, downtown Seattle (bartamaha Seattle), First Hill, iyo Madrona (Dariiqo 3) ama Judkins Park (Dariiqo 4). Wadajir, waxay u adeegaan in ka badan 11,000 oo rakaab ah maalintii. Labada dariiqba ayay badiyaa daahiyaan baabuurta ku xayiran waddada James Street ee u dhow waddooyinka gaagaaban ee laga galo waddada weyn ee I-5.

Si aan u wanaajinno xawaaraha iyo isku-hallayntooda, waxaan ku fikiraynaa inaan iyaga ka qaadno waddada James Street oo aan geyno waddooyinka Yesler Way, Eighth Avenue, iyo Ninth Avenue. Waxuu isbeddelkaasi weliba basaska si ka fiican ugu xiri doonaa bulshada Yesler Terrace ee dib loo dhisayo. Laakiin waxaa loo baahan doonaa in xarigga korontada ee baska lagu rakibo jidka cusub (fiiri maabka dhabarka ku yaal).

Waxaan la xiriirnay dadka raaca gaadiidkayaga xagaagii 2017, oo qaarkood badan ayaa noo sheegay inay taageersan yihiin guurinta ah hab lagu horumarinayo isku-hallaynta. Hase yeeshee, qaar badan ayaa ka welwelsanaa sidaa isbeddelku u saamaynayo waayeelka iyo dadka qaba naafanimada ama dakhliga hoose leh ee

isticmaala istaagyada ku yaal James Street si ay u gaaraan guriyaynta iyo adeegyada.

Waxaan u fiirsanaynaa habab kala duwan oo aan ku qancino baahiyada dadka gaadiidkayaga raaca, oo waxaan filaynaa inaan la wadaagno beesha qorshe cusub guga soo socda.

### Ra'yi dhiibo

- Booq barta internetka mashruuca ku taal [www.kingcounty.gov/metro/routes-3-and-4](http://www.kingcounty.gov/metro/routes-3-and-4)
- Isqor la socodsiiinta iimaylka ama tekeska ku saabsan Dariiqo 3 iyo/ama Dariiqo 4

### Xiriirka

Tristan Cook

Qorsheeyaha Xiriirrada Bulshada  
(Community Relations Planner)

[tristan.cook@kingcounty.gov](mailto:tristan.cook@kingcounty.gov)

Ama farriin ku dhaaf lambarka 206-296-0850

have a say

**Metro ayaa laga yaabaa in uu dariiqyada baska ee 3 iyo 4 ka qaado waddada James Street oo uu geeyo waddada Yesler Way**  
 Waxaan u fiirsanaynaa siyaabaha aan u horumarin lahayn isku-hallaynta baska oo aan ugu adeegi lahayn baahida raacayaasha mara James Street

- Dariiqa aanan la beddelin
- == Dariiqa suurogal ah in la tirtiro
- Dariiqa cusub ee suurogal ah
- Xarigga korontada ee baska ee cusub ee suurogal ah

- Istaagyada baska ee cusub ee suurogal u ah dariiqyada baska ee 3 iyo 4
- Istaagyada baska ee aanan la beddelin ee dariiqyada baska ee 3 iyo 4
- Istaagyada aanan iminka ka dib loo isticmaali doonin dariiqyada baska ee 3 iyo 4

